www.autismeducationtrust.org.uk

Sida ilmahaaga iskuul loogu doorto

Choosing a school for your child
Somali version

Tel: 07795 667749
Email: info@autismeducationtrust.org.uk
393 City Road, London EC1V 1NG, UK

Sida ilmahaaga iskuul loogu doorto

Kala duwanaanshaha iskuullada tirada badan ee jira awgeed, ayay waalidiinta oo dhammi ku wareeraan sidii ay iskuul ama xannaano carruureed (early years centre) ilmohooda ugu dooran lahaayeen. Buug-yarahaani wuxuu kuu faahfaahinayaa iskuullada kala duduwan ee jira, wuxuuna ku siinayaa talooyin laga yaabo inay kaa caawiyaan sidii aad iskuul ku haboon ugu dooran lahayd ilmahaaga qaba kulmiyaha cilladaha Autismka (autism spectrum disorder) (sida autism iyo Asperger syndrome).

Marka aad bilaabaysid raadinta iskuullada waxaa suurogal ah inaad maqashid erayga baahida waxbarashada gaarka ah (special educational needs). Erayga baahida waxbarashada gaarka ah (special educational needs (SEN)) waxaa loo adeegsadaa carruurta ay waxbarashadu ku adag tahay ama kuwa naafada ah, dhibaatooyinkaas oo keena in ilmaha ay ku adkaato inuu wax u barto sida kuwa la da'da ahi ay wax u bartaan. Sidaa awgeed ayaa sida badan autism spectrum disorders (ASD) loogu yeeraa baahida waxbarashada gaarka ah.

Ka hor inta aadan bilaabin xulashada iskuulka ilmahaaga ku haboon, waa inaad marka hore taqaanaa noocyada ay iskuulladu u kala baxaan. Maadaama xanuunka ASDgu uu qof kasta si gooni ah ugu dhaco, waxaa lamahuraan ah in maskaxda lagu hayo in ilmo kasta iskuulka ku habooni uu ka duwanaan karo mid ilmo kale ku haboon.

Iskuullo noocee ah ayaa la helaa?

Sida caadiga ah iskuulladu labo qaybood ayay u kala baxaan marka loo eego yaa iskuulka maalgeliya oo barnaamijyadiisa gacanta ku haya. Labadaas qaybood waxay kala yihiin iskuullada dawladda (state or maintained schools) kuwas oo sida caadiga ah maamulka degmadaadu ay maalgeliyaan. Dhammaan carruurta da'da iskuulka gaartay ee ku nool degmo dalka ka mid ahi waxay xaq u leeyihiin inay boos ka helaan mid ka mid ah iskuullada dawladda (maintained schools) ee degmadaas ku yaal.

Iskuullada aan dawladdu gacanta ku hayn ama iskuullo madaxbannaan (independent schools) waxaana ka mid noqon kara iskuullo gaar ah (special schools) iyo kuwo loogu talogalay ardayda diin ama dhaqan gaar ah wadata. Waalidiintu waxay carruurtooda geyn karaan iskuullada noocaas ah haddii ay kharashka iskuulka iska bixinayaa, hase yeeshee marmarka qaarkood maamulka degmadooda ayaa laga yaabaa inay kharashka iskuulkaas ka bixiyaan. Labadaan qaybood ee waawayn waxaa ka farcama noocyo kala duduwan oo iskuullo kale ah.

Noocyada iskuullada:

- **Mainstream schools (iskuullada caadiga ah):** iskuullada caadiga ahi (Mainstream schools) waa iskuullada loogu talogalay dhammaan ardayda da'doodu gaartay dugsiyada hoose/dhexe iyo kuwa sare. Iskuulladaani waxay noqon karaan kuwo dawladdu gacanta ku hayso iyo kuwo madaxbannaan. Sida uu dhigayo qaanuunka UK, Sharciga 2001 ee Baahida Waxbarashada Gaarka ah ee Naafonimada (Special Educational Needs Disability Act 2001), dhammaan carruurta naafada ah iyo kuwa baahida gaarka ah qaba, oo ay ku jiraan kuwa qaba ASD, waxay xaq u leeyihiin inay wax ku bartaan iskuulka caadiga ah. Sida badan iskuullada caadiga ahi waxay awood u leeyihiin inay taageero dheeraad ah iskuulka dhexdiisa ku bixiyaan. Taageeradaani waxay noqon kartaa qalab gaar ah, qorshe waxbarasho oo gaar ah ama taageero dheeraad oo kalkaaliyaha macallinku uu fasalka dhexdiisa ku bixiyo.

- **Xarun ama bar iskuul caadi ah ku dhex taal:** Xarun gaar ah ama bar kayd (specialist unit or resource base) waa meel ay ka jiraan fasallo gaar ah oo loogu talogalay ardayda ASDga qabta. Fasalladaasi waxay ku dhex yaalliin dugsiyada hoose/dhexe iyo kuwa sare ee iskuullada caadiga ah. Xarumahaan ama barahaani waxay leeyihiin ugu yaraan hal macallin oo u tababaran inuu wax baro carruurta ASDga qabta, macallinku wuxuu carruurtaas gargaar ugu fidyaa xarunta dhexdeeda isagoo sidoo kale ka caawiya sidii ay waqtiga ku haboon iskuulka caadiga ah ugu biiri lahaayeen.

- **Iskuullada Gaarka ah (Special schools):** iskuullada gaarka ahi waxay u gooni yihiin carruurta naafada ah ama kuwa waxbarashada gaarka ah u baahan. Ardayda ay iskuulladaani daryeelaan waa kala duwan yihiin: qaar iskuullada gaarka ah ka mid ahi waxay gaar u yihiin ardayda yaryar ee ASDga qabta; halka kuwa kale ay qaybo kala duwan u sii qaybsamaan sida kuwa carruurta waxbarashadu ku adag tahay, kuwa curyaammada ah ama kuwo dhibaatooyin kale qaba. Sida badan, macallimiinta iskuulladaan waxay soo maraan tababarro gaar ah si ay carruurta noocaan ah ula shaqeeyaan.

- **Iskuullo degaaneed (Residential schools):** iskuullada caadiga ah iyo kuwa gaarka ahiba waxay yeelan karaan qalab degaan oo ardayda u oggolaanaya inay dhismaha iskuulka habeenkii ku dhaxaan. Iskuullada noocaan ahi badanaa ma noqdaan iskuullo dawladeed ama kuwo madaxbannaan. Muddada ardaygu uu iskuulka ku nagaanayo way kala duwan tahay. Waxaa jira qaar iskuullada degaanka ka mid ah oo ardayda ASDga qabta loogu talogalay oo ardaydu ay iskuulka joogi karaan toddobaadka dhexdiisa oo kaliya, halka qaar kale ay sannadka oo dhan joogi karaan. Shaqaalaha iskuulladaan ka shaqeeyaayi waxay qaateen tababarro ilaa xad ah oo ASDga ku saabsan.

Sidee ayaan ku ogaan karaa iskuullada la heli karo?

Khasab ma ahan in dhammaan iskuullada kor lagu sheegay ay agagaarkaaga ku yaalliin. Maamulka degmadaada ayaa ayaa haya liis dhammaystiran oo ay ku qoran yihiin dhammaan iskuullada dawladda ee agagaarkaaga ku yaal oo ay ku jiraan iskuullada caadiga ah, iskuullda gaarka ah iyo baraha kulan (resource bases.).

Jamciyadda Qaranka ee Autistic (The National Autistic Society) ayaa daabacda buug-yare ay ku qoran yihiin dhammaan iskuullada qaata carruurta ASDga qabta. Waxay kaloo hayaan hage internet ah oo ay ku qoran yihiin faahfaahinta iskuullada ay ka war hayaan oo dhan. Haddaba si aad uga baartid iskuullada xaafadahaaga ku yaal booqo www.autism.org.uk/directory

Haddii aad rabtid inaad ilamahaaga geysid iskuul madaxbannaan, waxaad macluumaad ku saabsan iskuullada qaata carruurta ASDga qabta ka heli kartaa Hagaha Gabbitas ee iskuullada baahida gaarka ah (*Gabbitas guide to schools for special needs*), kaasoo sida caadiga ah aad ka heli kartid maktabadda xaafadaada ama adeegyada macluumaadka ee ay ka midka yihiin Gabbitas ama Adeegga Macluumaadka ee Iskuullada Madaxa bannaan - Independent Schools Information Service (ISIS). Qaar ka mid ah hay'adaha samofalka dadka naafada ah sida I-CAN iyo AFASIC ayaa iyaguna bixin kara macluumaad ku saabsan carruurta dhibku ka haysto hadalka iyo luqadda. Sida loola xiriiro adeegyadaan macluumaadka iyo hay'adaha samofalkaba waxaad ka helaysaa qaybta 'xiriirro waxtar leh'.

Waxaa suurogal ah in marmarka qaarkood aad qoyskaaga ama saaxiibadaa ku siiyaan talooyin ku saabsan 'iskuulka ugu fiican' ee xaafadda ku yaal. Haddaba waa inaad xusuusnaataa in ilmo kasta baahidiisu ay gooni u tahay oo waxa ilmo gaar ah ku habooni, xitaa haddii uu ASD qabo, aysan ilmahaaga ku haboonaan karin. Sidaa awgeed, waa inaad adigu baaritaan samaysaa si aad u dooratid waxa qoyskaaga iyo ilmahaaga ku haboon.

Booqashada iskuulka

Waxaa laga yaabaa inaad horay fikrad uga haysatay nooca iskuulka ee aad ilmahaaga la rabto, sidoo kale way dhici kartaa inaadan weli wax fikrad ah arrintaas ka haysan. Si kastase ha ahaatee, mid ka mid ah hababka ugu fiican ee lagu ogaan karo sida iskuulku u shaqeeyo iyo inuu ilmahaaga ku haboon yahay iyo in kale, waa adigoo iskuulka booqasho ku taga. Waxaa suurogal ah inaadan booqan karin iskuul kasta oo xaafadaada ku yaal hase yeeshee waa lamahuraan inaad iskuullo kala duduwan soo aragtid – iskuullada caadiga ah, xarumaha (units) iyo kuwa gaarka ah. Booqashooyinkaasi waxay fikrad fiican kaa siinayaan waxa iskuul kasta oo iskuulladaas ka mid ahi uu adiga iyo ilmahaagaba u hayo. Booqashooyinkaas

hordhaca ahi waxay kaloo kaa caawinayaan inaad ogaatid waxyaabaha ay tahay inaad ku tixgelisid iskuulka aad ilmahaaga u rabtid.

Booqashada iskuulku waxay noqon kartaa mid aan sahlanayn haddii aadan muddo dheer iskuul tegin. Sidaa awgeed waxaa fiican inaad booqashada u kaxeysatid lammaanahaaga, saaxiib ama qof qoyskaaga ka tirsan ama wakiil ka socda ururka taageerada waalidiinta ee degmada. Marka aad qof kale la socotid waxaa kuu suuroobaysa inaad fikrado kala duwan iskuulka ka qaadatid. Ka hor inta ayadaan iskuulka booqan ayaad go'aansan kartaan dhinaca uu qof walba xoogga saarayo. Tusaale ahaan, adigu waxaad la hadli kartaa Maamulaha (Head Teacher) ama Xiriiriyaha Baahida Waxbarashada Gaarka ah - SENCO (special educational needs co-ordinator), oo ah qofka mas'uulka ka ah xiriirinta iyo taageerada ardayda u baahan waxbarashada gaarka ah ee dugsiyada caadiga ah, halka qofka kula socda uu xoogga saari karo qalabka iskuulku ku hawlgalo. Sidoo kale waxaa iyaduna wanaagsan inaad sii diyaarsatid su'aalaha aad rabtid inaad weydiisid muddada aad booqashada ku guda jirtid.

Su'aalaha ay tahay inaad (maamulka) weydiisid

Su'aalaha aad maamulka weydiin dootid waxay ku xirnaan doonaan hadba inta ay baahidaadu le'eg tahay. Su'aalaha soo socdaayi waxay tusaale ka yihiin waxyaabaha laga yaabo inaad faahfaahin uga baahatid.

1. Nidaam ama waddo noocee ah ayuu iskuulku maraa si uu ula shaqeeyo ardayda ASDga qabta?
2. Haddii uu iskuulku adeegsado nidaam gaar ah sida TEACCH, diyaar ma u yihiin inay beddelaan iyagoo fiirinaya baahida ilmaha?
3. Iskuulku ma bixiyaa fursado qof-qof ama koox-koox wax loogu barto?
4. Sidee ayuu iskuulku u maareeyaa waqtiga firaaqada ah ee qadada? Tusaale ahaan, ma jiraan Kulammo qado (lunch-time clubs) ama hawlo kale oo nidaamsan oo ilmahaagu ka qayb qaadan karo?
5. Taageerooyin dheeraad ah oo noocee ah ayuu ilmahaagu xirfadlayaasha ka heli karaa sida; kalkaaliyaha hadalka iyo luqadda ama kalkaaliyaha guud (speech and language therapist or occupational therapist)?
6. Immisa mar ayuu iskuulku taageero ka helaa baraha talo-bixinta ASDga (ASD advisory teacher)? (waa haddii iskuulku yahay mid dawladeed.)
7. Hab noocee ah ayuu iskuulku isticmaalaa si uu waalidiinta xiriirkooda u joogteeyo (sida; buugaagta guriga-iskuulka, dhanbaallada internetka, dhanbaallada caadiga ah, warsidayaasha)?
8. Shaqaalaha iskuulka oo dhammi ma qaateen tababar ASDga u gaar ah?
9. Si joogto ah tababarkaas ma loo cusboonaysiiyaa?

10. Shaqaaluhu waayoaragnimo ma u leeyihiin la shaqaynta carruurta ASDga qabta?
11. Immisa mar ayay shaqaaluhu kulan ka yeeshaan mid ilmaha ka mid ah (kulankaan waa inay ku jiraan macallimiinta, caawiyaha fasalka, kor-joogayaasha waqtiga qadada, horjoogayaasha baska iyo xirfadlayaasha dibadda ka yimid (classroom assistants, lunchtime supervisors, bus escorts)?
12. Iskuulku ma u fidiyaa carruuurta ASDga qabta taageero waqtiga iskuulka ka baxsan sida; kulammo quraaceed, kooxo iskuulka ka dib kulma (breakfast clubs, after-school clubs)?
13. Iskuulku ma leeyahay barnaamij SEN iyo hagardaamada la xiriira (SEN and bullying policy)? (haddii uu leeyahay weydiiso nuskho barnaamijka ah.)
14. Iskuulku ma leeyahay barnaamij anshaxa iskuulka la xiriira? (Nuskho weydiiso.)

Marka laga reebo weydiinta su'aalaha iyo qaadashada nuskhooyinka barnaamijyada, waa inaad sidoo kale iskuulka lug ku soo martaa si aad qaybaha iskuulka fikrad uga qaadtid. Waxyaabaha ay tahay inaad si fiican ugu kuurgashid waxaa ka mid ah:

- Hawlo noocee ah ayay ilmuhu sameeyaan?
- Shaqaaluhu ma u muuqdaan kuwo diirran oo dabacsan?
- Fiiri sida iskuulku u adeegsado barnaamijyada waxbarasho ee kala duduwan sida; jadwalka muuqaalka.
- Dhismaha iskuulku ma ku haboon yahay ilmahaaga (heerka sharqanta, iftiinka, sida fudud ee iskuulka looga baxsan karo!)?
- Sidee carruurta loo ciyaarsiiyaa waqtiga ciyaarta?
- Goobta ciyaartu ma leedahay qaybo kala duwan oo ilmahaagu ay qayb aan buuq lahayn ka dooran karaan marka ay u baahdaan?
- Ma jiraan meelo qarsoon oo ilmahaaga lagu cabsi-gelin karo?
- Ma jiraan dad waawayn oo carruurta la jooga marka ay goobta ciyaarta ku ciyaarayaan?

Haddii ay suurigal tahay la sheekayso waalidiin kale oo carruurtoodu iskuulka dhigato si aad fikrad uga qaadatid sida ay iyaguna iskuulka u arkaan. Hase yeeshee ogsoonoow in waxyaabaha aad iskuulka uga baahan tahay ay ka duwanaan karaan wayaabaha ay iyagu uga baahan yihiin.

Soo ururinta doorashooyinkaaga

Marka aad iskuul cusub booqatidba waxaad dareemaysaa waxayaabaha mudnaanta koowaad kuu leh. Liis ka samee waxyaabahaas aad mudnaanta koowaad siinaysid oo u fiiri sida looga helayo iskuullada aad booqatay. Waxay u dhowdahay inaadan helin iskuul koobaya dhammaan waxyaabaha aad mudnaanta siinaysid. Arrintaani waxay keenaysaa inaad waxyaabaha

qaar ka tanaasushid. Haddaba doorashadaada ku soo koob labo ama saddex iskuul. Doorashada noocaan ahi waxay kuu fududaynaysaa inaad iskuul kale dooratid marka iskuulkaaga koowaad uusan boos ka bannaanayn.

Codsashada iskuulka

Carruurta ASDga qaba qaarkood waxay u baahan karaan bayaanka baahida waxbarashada gaarka ah (statement of special educational needs), taasoo badanaa loo soo gaabiyo bayaan (statement). Bayaankaan waxaa soo saara maamulka degmada iyagoo maamulka degmadu ay bayaankaas kharash dheeraad ah ku bixinayaan si loo daboolo baahida ilmaha ee iskuulka dhexdiisa. Qaar carruurta ka mid ahi waxay bayaanka haysan karaan ka hor inta aysan iskuulka bilaabin. Kuwa kale hawshaani waxay u bilaabmaysaa marka ay iskuulka bilaabaan, qaarkoodna waxaa laga yaabaa inaysan weligood bayaan u baahan.

Haddii aad codsanaysid iskuul dawladeed ama mid caadi ah, uma baahnid inaad codsigaaga ka hor ilmahaaga bayaan u heshid. Hase yeeshee waxaa fiican inaad bayaanka horay isaga sii codsatid si, haddii ay dantu ku tiraahdo, aad iskuul kale u dooratid. Haddii aad rabtid inaad ilmahaaga geysid iskuul gaar ah ama mid madaxbannaan sida caadiga ah ardayga bayaan ayaa looga baahan doonaa ka hor inta aan codsiga la samayn. Si aad wax badan uga ogaatid sida bayaannada loo sameeyo (statementing), akhriso buug-yaraha DCSF ee waalidka iyo xannaaneeyaha.

Haddii ilmahaagu bayaan haysto

Sharcigu wuxuu dhigayaa in waalid ahaan aad xaq u leedahay inaad sheegto iskuulka aad dooratay. Marka ilmuhu uu helo bayaanka kama dambaysta ah qaybta 4aad ee dukumintiga waxaa ka muuqan doona magaca iskuulka uu ilmuhu gelayo. Hase yeeshee qaybta 4aad ee bayaanka **la soo jeediyay** (waa nuskho bayaanka ah oo la soo diro ka hor inta aan dukumintiga la dhammaystirin) way bannaanaan doontaa. Marka uu bayaanka la soo jeediyay ku soo gaaro ayaad maamulka degmada weydiisan kartaa inay qaybtaan ku qoraan iskuullada aad codsatay. Ka hor inta aysan codsigaaga oggolaan, waxay maammulka degmadu hubsan doonaan in iskuullada aad qoratayi ay ilmahaaga oggol yihiin iyo in kale.

Haddii maamulka degmadu ay diidaan inay bayaanka ku qoraan iskuullada aad dooratay, waxaad xaq u leedahay inaad ogaatid sababta ay u diideen oo ka codsato inay go'aanka dib ugu noqdaan. Haddii aad arrimahaan dhibaato kala kulantid, waxaan kugula talinaynaa in ka hor inta aadan saxiixin bayaanka kama dambaysta ah aad talobixin weydiisatid Adeegga Hawlwadaagga Waalidiinta (Parent Partnership Service) ama mid ka mid ah

khadadka gargaarka (helplines) ee aad ka helaysid qaybta ‘Xiriirro waxtar leh’.

U gudbista dugsiga sare iyadoo laga gudbayo dugsiga hoose/dhexe

Ardayda haysata bayaanka oo ka gudbaysa dugsiga hoose/dhexe una gudbaysa dugsiga sare, ma raacayso waddada caadiga ah ee iskuullada lagu soo galo. Maamulka degmadoodu waa inay bayaankooda beddelaan si ay ugu qoraan iskuulka cusub ee ardaygu u wareegay ugu dambayn 15ka February ee sannadka wareejintu dhacday. Arrimahaan waxaa lagu faahfaahiyay Hab Dhaqanka Baahida Wabarashada Gaarka ah (Special Education Needs Code of Practice) ama Hab dhaqanka (Code of practice) qaybaha 5:72 iyo 8:132. Astaanta Dhaqanka ee Baahida Wabarashada Gaarka ah ama Astaanta dhaqanku waa tusmo loogu talogalay iskuullada iyo maamullada degmooyinka oo ku tusaysa sida loo gargaaro carruurta u baahan waxbarashada gaarka ah.

Astaanta dhaqanka dhexdeeda waxaa lagu sheegay in dib-u-eegista sannadka (annual review) ee fasalka 5aadi ay talooyin cadcad kaa siinayso iskuulka ilmahaaga ku haboon marka uu dhammaysto dugsiga hoose/dhexe. Sidaa awgeed waa lagamamaarmaan in adiga iyo ilmahaaguba aad booqataan dugsiga sare ee aad ku talojirtid inaad ilmahaaga geysid ka hor dib-u-eegista fasalka 5aad si aad doorashadaada u samaysid.

Ma jiro waqti u go’an in bayaanka la beddelo marka ilmuhu xannaanada (early years) uga gudbayo dugsiga hoose/dhexe.

Xiriirro waxtar leh

Macluumaadka adeegyada soo socda badankood waxaa lagu bixiyaa af Ingiriis. Haddii ay jirto hay’ad macluumaadka luqad kale ku bixisa waa la sheegayaa.

Khadadka gargaarka ee telefoonnada:

Advocacy for Education Service (Adeegga Qareennimada Waxbarashada)
Tel: 0845 070 4002
Website: www.autism.org.uk/advocacy
The National Autistic Society ee Advocacy for Education Service waxay waalidiinta talooyin ka siiyaan sidii ay ilmohooda ASDga qaba ugu heli lahaayeen waxbarashada ugu haboon, waxay kaloo taageero u fidiyaan waalidiinta haysta carruur ASD qaba oo maxkamad sare (Tribunal) racfaan u qaadanaya. Marka aad la xiriiraysid Advocacy for Education Service waa inaad telefoonka jawaabta uga tagtaa farriin iyo sida laguula soo xiriiri karo oo

af Ingiriis ah. Haddii aad turjumaan u baahan tahay, fadlan ku sheeg farriinta adigoo luqadaa aad rabtidna sheegaya.

AFASIC
Tel: 0845 355 5577
Furan 10gh-2gd, Talaado iyo Arbaco; 10gh-duhurkii Khamiis.
AFASIC waxay talooyin iyo macluumaad siiyaan waalidiinta dhalay carruur iyo dhallinyaro hadalka iyo luqaddu ay dhibaan.

IPSEA (Independent Panel for Special Education Advice) (Guddiga Madaxa bannaan ee Talo-bixinta Waxbarashada Gaarka ah)
Tel: 0800 018 4016 Website: www.ipsea.org.uk
Khadkaan gargaar waxaa jooga shaqaale khibrad leh oo talooyin ka bixiya dhammaan wixii la xiriira baahida waxbarashada gaarka ah.

ACE (Advisory Centre for Education) (Xarunta Talo-bixinta Waxbarashada)
Tel: 0808 800 5793 (talooyinka guud)
Tel: 0808 800 0327 (talooyin ku saabsan ilmaha iskuulka laga cayriyo)
Furan 10gh-5gd, Isniin ilaa Jimce.
Khadkaan gargaar waxaa loogu talogalay waalidiinta iyo xirfadlayaashaba, wuxuuna bixiyaa talooyin iyo macluumaad dhinacyo badan oo waxbarashada taabanaya.

Network 81
Tel: 0870 770 3306
Website: www.network81.org/
Furan10gh-2gd, Isniin ilaa Jimce.
Talooyin ku saabsan dhammaan arrimaha la xiriira baahida waxbarashada gaarka ah.

Education advice services (Adeegyada Talo-bixinta Waxbarashada):

Gabbitas Educational Consultants
Carrington House
126-130 Regent Street
London W1R 6EE
Tel: 020 7734 0161
Fax: 020 7437 1764
Email: market@gabbitas.co.uk
Website: www.gabbitas.co.uk

Talo-bixiyayaasha Waxbarashada ee Gabbita (Gabbitas Educational Consultants) waxay adeeg u fidiyaan waalidiinta raba inay ilmohooda u helaan iskuul ku haboon oo madaxbannaan. Lacag ayay ka rabaan qofka ay u adeegaan.

Waxay kale oo soo saaraan Hagaha Gabbitas ee iskuullada baahida gaarka ah (*Gabbitas guide to schools for special needs*) oo lagu daabaco Kogan Paul, kaasoo ay ku qoran yihiin dhammaan iskuullada gaarka ah iyo kuwa madaxa bannaan ee dalka Ingiriiska ku yaal ee diyaarka u ah inay qaataan ardayda waxbarashada gaarka ah u baahan. Hagahaan waxaad ka dalban kartaa maktabadaha guud iyo kuwa gaarka ah ee xaafadaada.

National ISIS
Grosvenor Gardens House
35-37 Grosvenor Gardens
London SW1W 0BS
Tel: 020 7798 1500
Email: national@isis.org.uk
Website: www.isis.org.uk

Adeegga Macluumaadka ee Iskuullada Madaxa bannaan (The Independent Schools Information Service) (ISIS) waxay bixiyaan adeeg la mid ah kan ay Gabbitas bixiyaan.

National Parent Partnership Network (NPPN)
(Dalladda Qaran ee Hawlwadaagga Waalidiinta)
Website: www.parentpartnership.org.uk/Templates/index.htm

Waa adeegyo madaxbannaan oo loogu talogalay waalidiinta haysta carruurta waxbarashada gaarka ah u baahan. Waxaana adeeggan maalgeliya Dawladda dhexe. Dallaadu waxay bixiyaan taageerooyin la xiriira sidii aad ilmahaaga ugu heli lahayd iskuul haboon iyo taageero waxbarasho.

Invalid Childrens Aid Network (I-CAN)
(Dalladda Gargaarka Carruurta Naafada ah).
I-CAN waxay daabacaan liiska iskuullada loogu talogalay carruurta hadlka iyo luqaddu dhibaan. Waxaad nuskho ka dalban kartaa telefoonka 0870 010 4066.

Qoraallo waxtar leh:

The National Autistic Society (2004). *Schools, units and classes for children with autism and Asperger syndrome* (Iskuullo, Xarumo iyo fasallo loogu talogalay carruurta qabta autismka iyo cilladaha Asperger) London: (The National Autistic Society). Waxaa laga dalban karaa madbacadaha NAS Publications.

NAS Publications
Central Books Ltd
99 Wallis Road
London E9 5LN
Tel: +44 (0)845 458 9911
Fax: +44 (0)845 458 9912
Email: nas@centralbooks.com
Online orders: www.autism.org.uk/pubs

© Autism Education Trust 2009

Waxaa laga soo qaatay warbixin ay soo saartay National Autistic Society

Eray bixin

After-school clubs (Kulammada Iskuulka ka dib) – waa hawlo bulsho oo waqtiga firaaqada ah lagu qabto iskuulka gudihiisa marka saacadaha iskuulku dhammaadaan.

Annual review (Dib u ee gista sannadlaha) – waa dib u eegis sannadle ah oo lagu sameeyo bayaanka baahida waxbarashada gaarka ah.

ASD advisory teacher (Bare ka talo-bixiya ASDga) – waa bare takhasus leh oo booqda iskuullada iyo xannaanooyinka carruurta si uu talo iyo taageeraba u siiyo macallimiinta wax bara ardayda qabta kulmiyaha cilladaha autismka (autism spectrum disorders).

Asperger syndrome (Astaamaha asperger) – waa nooc autism ah oo qofka aysan waxbarashadu ku adkayn hadalkuna uusan ka daahin

Autism (Autism) – waa naafannimo saamayn ku yeelata sida qofku uu dadka iyo dunida hareerihiisa ah ula xiriiro.

Autism spectrum disorders (Kulmiyaha cilladaha autismka) – waa magac guud ama ‘astaan dallad ah’ oo loo adeegsado dadka qaba autismka iyo naafooyinka kale ee la xiriira.

Breakfast club (Kulanka quraacda) – waa kulan ardayda fursad u siinaya inay iskuulka yimaadaan ka hor inta uusan iskuulku bilaabman oo halkaa ay ku quraacdaan.

Bus escorts (Horjoogayaasha baska) – waa marka maamulka degmadu ay bixiyaan gaadiidka iskuulka loo raaco, horjoogayaasha basasku waxay ardada naafada ah la raacaan baska ama tagsiga iskuulka u qaada oo ka keena.

Classroom assistants (Gargaarayaasha fasalka) – waa dadka ardayda fasalka dhexdiisa ku caawiya iyagoo ardayda si gooni-gooni ama kooxo yaryar ah ula shaqeeya.

Department of children, schools and families (DCSF) (Waaxda carruurta, iskuullada iyo qoysaska) – waa hay'adda dawladda u qaabilsan inay waxbarashada carruurta u dejiso iskuullada iyo maamullada degmooyinka.

Early years centre (Xarunta Sannadaha hore) - waxay bixiyaan waxbarashada ilmaha 5ta sano ka yar ee aan iskuulka gaarin iyagoo waxabarashadaas ku bixiya meelo kala duwan oo ay ka mid yihiin xannaanooyinka, iskuullada, maalin haynta ama koox-ciyaareedyada.

Head Teacher (Maamulaha) – waa qofka iskuulka mas'uulka ka ah.

Helplines (Khadadka gargaarka) – sida badan waa khad telefoon oo laga helo macluumaad arrin gaar ah la xiriira.

Independent school (Iskuul madax bannaan) – waa iskuullada aan dawladda maalgelin ka helin.

Lunchtime clubs (Kulammo qado) – waa hawlo ama kooxo gaar ah oo la diyaariyo waqtiga qadada si carruurta ASDga qabta ay uga qayb qaataan hawlaha ama kooxaha bulsho ee ay xiisaynayaan.

Lunchtime supervisors (Horjoogayaasha waqtiga qadada) – dadka ilaaliya anshaxa carruurta marka ay carruurtu hoolka cuntada ku qadaynayaan iyo marka ay goobta ciyaarta joogaan.

Mainstream school (Iskuul caadi ah) – iskuullada caadiga ah ee loogu talogalay dhammaan carruurta da'da dugsiyada hoose/dhexe iyo sare gaartay.

Occupational therapist (Kalkaaliyaha guud) – waa xirfadlayaal carruurta la shaqeeya si loo hagaajiyo qaab dhismeedka jirkooda iyagoo carruurta siiya talooyinka la xiriira qalabka ay u baahan yihiin iyo isticmaalkiisaba.

Residential school (Iskuul degaaneed) – waa iskuullada ay carruurtu habeenkii ku baryi karaan.

SEN and bullying policy (Barnaamijka SEN iyo hagardaamada) – waa nidaam faahfaahinaya sida ay tahay in iskuulladu u maareeyaan hagardaamada loo geysto carruurta waxbarashada gaarka ah u baahan

Special educational needs (Baahida waxbarashada gaarka ah) – oraahdaan waxaa UK looga isticmaalaa in lagu muujiyo carruurta ay waxbarashadu ku adag tahay ama naafada ah ee aan wax u baran karin si la mid ah sida carruurta la da'da ahi ay wax u bartaan.

Special educational needs code of practice (Hab dhaqanka baahida waxbarashada gaarka ah) – waa hage iskuullada iyo maamullada degmooyinka tusaya sida loo caawiyo carrruurta waxbarashada gaarka ah u baahan.

Special educational needs co-ordinator (Xiriiriyaha baahida waxbarashada gaarka ah) - qofka mas'uulka ka ah isku-xirka taageerooyinka loo fidiyo ardayda waxbarashada gaarka ah u baahan ee dhigta iskuullada caadiga ah.

Special educational needs disability act 2001 (Sharciga 2001 ee naafonimada baahida waxbarashada gaarka ah) – waa sharci faahfaahinaya xuquuqda ay leeyihiin ardayda waxbarashada gaarka ah u baahan iyo waddada qaanuun ee la raaco marka la taageerayo.

Special school (Iskuul gaar ah) – iskuullada u gaarka ah carruurta naafada ah ama kuwa u baahan waxbarashada gaarka ah.

Specialist unit or resource base (Xarun gaar ah ama bar kayd) – waxay ku yaallliin iskuullada caadiga ah ee hoose/dhexe iyo sare ee leh fasallo u gaar ah ardayda qaba ASDga. Marmarka qaarkood carruurta waxaa wax lagu baraa ama lagu taageeraa xarunta iyagoo markii la doonana laga caawiyo sidii ay iskuulka caadiga ah ugu biiri lahaayeen.

Speech and language therapist (Kalkaaliyaha hadalka iyo luqadda) – xirfadlayaasha ka shaqeeya horumarinta qaabka hadalka iyo xiriirka.

State or maintained school (Iskuul dawladeed) – waa iskuulka sida caadiga ah ay maamulka degmadu maalgeliyaan.

Statement of special educational needs (Bayaanka baahida waxbarashada gaarka ah) – bayaankaan waxaa soo saara maamulka degmada si markaas loo bixiyo taageero dheeraad ah oo lagu daboolayo baahida ilmaha iskuulka dhigta.

Treatment and Education of Autistic and related Communication handicapped Children (TEACCH) (Daawaynta iyo Waxbarista Carruurta qabta Autstic iyo taag-darrooyinka xiriirrada ku lug leh) – waa hab nidaamsan oo loola shaqeeyo dadka ASDga qaba iyadoo la adeegsanyo taageero muuqaallo wadata.

The National Autistic Society (Jamciyadda Qaranka ee Autistic) – waa hay'ad samofal ah oo dadka ASDga qaba iyo qoysaskoodaba u fidisa taageero, talooyin iyo adeegyo kale.